



LIDA Stories

lidastories.net

**Codka shimbiraha subaxdii /
Lyden av fugler om morgenen**

✎ LIDA Portugal

👤 Vilius Aistis Vilimas

📖 Mohamed Abdirashid (so), Espen

Stranger-Johannessen (nb)



This work is licensed under a Creative Commons
[Attribution 4.0 International License](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0).
<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0>



**Codka shimbiraha subaxdii /
Lyden av fugler om morgenen**

✎ LIDA Portugal


👤 Vilius Aistis Vilimas

📖 Mohamed Abdirashid

|| 5

🗣 Soomaali / norsk





Yulia, ninkeeda iyo gabadhooda yar waxay ku noolaayeen tuulo yar oo xasilloon oo ku taal Ukraine. Yulia waxay aad u jeclayd in subax walba kusoo kacdo dhawaaqa shimbiraha. Marna uma malaynayn inay guri ka fog degi doonto, ama aanay ku toosi doonin dhawaaqa shimbiraha subaxdii.

. . .

Yulia, mannen hennes og den lille datteren deres bodde i et lite, rolig tettsted i Ukraina. Yulia likte veldig godt å våkne hver morgen til lyden av fugler. Hun trodde aldri at hun skulle bo langt hjemmefra, eller at hun ikke skulle bli vekket av lyden av fugler om morgenen.



Ninkeeda ayaa had iyo jeer ka caban jiray in
aanu lacag ku filan hayasanin, wuxuuna bilaabay
inu si aad ah u cabbo khamriga. Waxay
go'aansadeen inay nasiibkooda ku tijaabiyaan
Portugal. Waxaa laga yaabaa in ay halkaas ka
heli karaan lacag badan si ay guri u dhistaan oo
ay mustaqbal wanaagsan ugu sameeyaan
qoyskooda.

...

Mannen hennes klaget alltid över mangelen på
pengar, og han begynte å drikke mye. De
bestemte seg for å prøve lykken i Portugal.
Kanskje de der kunne tjene mer penger til å
bygge et hus og en bedre framtid for familien.



Yulia waxay si fiican ula qabsatay gurigeeda cusub, waxayna bilowday inay ka shaqeyso sidii nadiifiye. Macaamiisheeda ayaa runtii aad uga mahadceliyey dadaalkeeda iyo hab-dhaqankeeda wanaagsan. Dhanka kale ninkeeda waxa uu dareemay in laga tagayo. Dhibaata khamriga awgeed, loo-shaqeeyayaashu ma aaminaan isaga mana siin doonaan shaqo.

...

Yulia tilpasset seg det nye hjemmet godt, og hun begynte å jobbe som hjemmehjelp. Kundene hennes satte virkelig pris på arbeidet hennes og den høflige innstillingen hennes. Mannen hennes, derimot, følte seg stadig mer oversett. På grunn av alkoholproblemet hans stolte ikke arbeidsgivere nok på ham til å gi ham arbeid.



Yulia waxay tagtay hoya haweenka, halkaas oo ay dareentay in ay ka heshay ammaan ka badan intii ay haysatay muddo dheer. Taasi may dareemin tan iyo markii ay subaxdii ku toosi jirtay codka shimbiraha.

...

Yulia dro til et krisesenter, hvor hun følte seg tryggere enn hun hadde gjort på lenge. Hun hadde ikke følt seg sånn siden hun ble vekket av lyden av fugler om morgenen.



Maalin maalmaha ka mid ah ayuu bilaabay inuu ku qayliyo Yulia. Dabadeed, wuxuu bilaabay inuu riixo. Qayladii iyo garaacii baa ka sii daray, siiba markuu sakhransanaa. Yulia waxay u baqday nafteeda iyo gabadheeda, laakiin ma aysan garanayn waxay samayn karto.

...

En dag begynte han å kjefte på Yulia. Senere begynte han å dytte henne. Volden økte med skriking og slag, særlig når han var full. Yulia var redd for seg selv og for datteren sin, men hun visste ikke hva hun skulle gjøre.



Markii Yulia ugu dambeyntii ay tagtay qolka gargaarka degdegga ah ee cusbitaalka iyada oo gacan ka jaban, waxay u sheegeen in rabshadaha qoysku ay dhibaato weyn ku tahay Portugal. Waxa kale oo ay sheegeen in arrintaasi ay tahay dambi, isla markaana ay tahay inay Booliska wargeliso.

...

Da Yulia omsider måtte dra til legevakten på sykehuset med brukket arm, fortalte de henne at partnervold var et stort problem i Portugal. De sa også at det var ulovlig, og at hun burde anmelde det til politiet.



Yulia waa ay ku daashay oo ma aysan dooneyn in gabadheeda yar ay ku korto guri ay maalin kasta goobjoog u ahayd rabshad. Yulia waxay ogaatay in calaamadaha xadgudubka ay horay u jireen, xitaa haddii ay qaadatay qaabab badan oo kala duwan.

...

Yulia var utslitt og ville ikke at den lille datteren hennes skulle vokse opp i et hjem hvor hun var vitne til vold daglig. Yulia innså at tegnene på mishandling hadde vært der hele tiden, selv om de så veldig forskjellige ut.